



## Warbixin ku saabsan Covid-19 (koronavirus) oo Noorwiiji ah - november 2020

Salaan!

Tani waa fariin muhiim ah oo ka socota dhakhtarka sare ee degmada Gjøvik.

Qoyskaaga, waxaa ku jira hal ama in ka badan oo qof oo qaba cudurka loo yaqaan 'covid-19' (coronafirus). Kuwa uu ku dhacay covid-19 ku waa inay kujiraan go'doon. Inta kale ee reerka waa in ay ku jiraan karantiil.

Ma aha suurto gal in la idin soo booqdo mana booqan kartaan inta aad go'doonka ku jirtaan oo aad karantiilka tihiin. Ma jiro qof reerka ka mid ah oo aadi/tagi kara xanaanada caruurta, iskuulka, shaqada ama dukaanka. Kuwa qaba xanuunka covid-19 waxa ay ku jiri doonaan go'doomin waana inay guriga joogaan. Waxay u bixi karaan oo keliya jardiinadooda ama balakoonka. Kuwa karantiil ku jira ayaa banaanka u bixi kara in ay socodaan haddii ay ilaaliyaan ka dheeraanshaha oo ay ka fogaadaan meelaha ay ku badan yihiin dadku.

Waa inaad raacdaan farriimaha aad ka heleyso go'doominta iyo waqtiga karantiil ee kooxda ka hortagga cudurka ee Gjøvik. Fariimaha xanaanada caruurta, iskuulka ama shaqada ee ku saabsan waqtiga karantiilku ma khuseeyaan kuwa idinka mid ah ee qof reerkaaga ka tirsan qabo xanuunka covid-19.

Haddii aadan raacin sharciyada karantiilnimada iyo go'doominta, waxaa la idinku dacwayn karaa booliska.

Haddii mid idinka mid ahi buko oo u baahdo caawimaad dhakhtar, ha waco GP-gaaga/dhakhtarkaaga joogtada ah maalintii iyo dhakhtarka heeganka ah (# 116 117) fiidkii / habeenki / dhammaadka usbuuca. Caawimaad degdeg ah, wac 113.

Waxaas oo dhan waa inaad ku dhaqaaqdaa si aan si wada jir ah ula dagaallanno iskudhafka xanuunka covid-19 oo aan uga hortagno qalalaasaha iyo dad badan oo jiran iyo kuwa u dhinta xanuunka. Si wada jir ah ayaan u sameyn karnaa tan.

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, wac 476 01 657.

Si daacad ah  
Dhakhtarka sare ee Gjøvik.



GJØVIK KOMMUNE

